# Sharciga cusub ee faldembiyeedka galmooshada

Sharciga cusub ee faldembiyeedka galmooshadu wuxuu dhaqangalay 1.1.2023. Dib u habaynta sharcigu waxay xoojinaysaa ilaalinta xuquuqda badbaadada galmada shakhsiga iyo xuquuqda isu talinta ee qof kasta.

Isbeddelka ugu muhiimsan waa, in qeexidda kufsigu ay hadda kaddib ku salaysan tahay oggolaansho.

Kufsigu waa galmo lala sameeyo qof aan si ikhtiyaar ah galmada uga qaybqaadan. Ikhtiyaarnimo la'aantu waa mid muhiim u ah dembiyada kale ee galmada la xiriira. Dib u habaynta sharcigan ayaa keeneysaa in la adkeeyo ciqaabaadka dembiyada u galmooshada.

Ka sokow kufsiga, sharciyo badan oo kale oo quseeya dembiyada u galmooashada ee sharciga dembiyada qaybtiisa 20 ayaa isbeddelay. Isbeddelka muhiimka ah waa tusaale ahaan, in dembiga faraxumaynta galmada la xiriirta lagu geli karo si kale oo aan ahayn in qofka kale la taa-taabto, marka uu falku aad u daranyahay. Faafinta sawir galmo la xiriira iyadoo aan oggolaansho loo heysan ayaa ah sida uu qabo sharcigan cusub mid ay ciqaabi ka dhalanayso. Sharciga cusub wuxuu qaabab badan ku soo faragelinayaa xadgudubyada galmada la xiriira ee shabakadda internetka ka dhaca.

Qeexidda dembiyada galmada ee carruurta ka dhanka ah waxaa xoogga lagu saarayaa xuquuqda ilaalinta cunugga. Dembiyada carruurta loo geysto waxaa loo arkayaa sidii hore si ka daran. Waxaa kale oo la xoojiyay ciqaabaadka ka dhalanaya dembiyadaas. Asalku waa, in cunuggu aanu oggolaan karin in uu qof qaangaar ah la sameeyo fal galmo ah.

## Kufsi

Oggolaanshaha dhibanaha ayaa muhiim ah marka la qeexayo kufsiga.

Kufsi waxaa loola jeedaa galmo lala sameeyo qof aan si ikhtiyaar ah galmada uga qaybqaadan. Ikhtiyaarnimada waa in lagu muujiyaa hadal, ficil ama hab kale. Ikhtiyaarnimo ma ahan qof galmo lagu qasbay iyadoo rabshad ama hanjabaad la adeegsanayo ama qof aan rabitaankiisa sheegi karin.

Inta badan dhibanaha kufsigu si firfircoonaan ah isuma difaaco marka la kufsanayo. Waxaa laga yaabaa in uu dhibanuhu yahay qof liita ama dansan. Sidaas darteed ayuu xittaa kufsigu u dhici karaa iyadoo aanay jirin xoog-sheegasho, hanjabaad ama xaalad kale oo gaar ah oo uu bukaanku qabo, sida dhibanaha oo sakhraansan ama dansan.

Sharciga cusub ma xadaynayo galmada u dhexeeysa dadka waaweyn ee aan ku xadgudbayn xaqa isu-talinta galmada ee qofka kale.

Waxaa soo socda su'aalo iyo jawaabo waxqabad u badan oo ku saabsan, sida ay qeexidda kufsigu isubeddeshay dib u habaynta sharciga kufsiga kaddib.

**Sidee ayeey dib u habaynta sharcigu u hagaajinaysaa xaaladda dhibanaha?**

Waxaa markii hore qeexidda kufsiga xoogga lagu saari jiray, in falka xoog ama hanjabaad loo adeegsaday ama in dhibanuhu uu xaalad gaar ah oo daciifnimo ah ku jiray. Sharciga cusub waxaa udub dhexaad ah u rabitaanka dhibanaha. Tani waxay hagaajinaysaa xaaladda dhibnaha marka lagu jiro dhammaan marxaladaha ka baaraandegista dembiga.

**Maxaa ikhtiyaarnimo loola jeedaa sideese loo muujin karaa?**

Macnaha ikhtiyaarinimadu kama duwana luqadda guud. Su'aashu waa, in qofka kale doonayo in uu hawsha ka qaybgalo iyo in aanu doonayn. Looma baahna in hab gaar ah oo cayiman loo muujiyo ikhtiyaarnimada. Ikhtiyaarnimada waxaa lagu muujin karaa tusaale ahaan hadal, jir-hadal ama ficil kale.

**Ma qasabbaa in markasta la muujiyo, haddii aan la doonayn in qof kale lala sameeyo galmo?**

Arrinta ah, in aan la rabin in si ikhtiyaari ah looga qaybqaato uma baahna in hadal ahaan ama ficil ahaan si toos ah loogu muujiyo. Ka qaybqaadashada looma arki karo mid ikhtiyaari ah, haddii aan la arki karin ikhtiyaarnimada qofka kale. Waxaa dhici karta in qof kale uu yahay tusaale ahaan mid gebi ahaanba dansan, sababtoo ah wuu baqanayaa, aad ayuu u sakhraasan yahay ama u hurdayaa. Markaas rabitaankiisa ma samayn karo ama ma muujin karo rabitaankiisa, in loo galmoodaana waa kufsi.

**Ma qabsabbaa in wasmada ama galmada darteed qofka kale looga helaa oggolaansho qoraal ana hadal ah?**

Looma baahna in gooni ahaan oggolaanshaha loogu sheego ama sameeyo hab cayiman. Muhiimadda galmadu waa in labada dhinac ay si ikhtiyaari ah uga qaybqaataan galmada. Rabitaanka ka qaybgalka galmada waxaa loo sheegi karaa hab kale oo aan hadal ahayn.

**Maxaa dhacaya haddii qofka falka galmada ah lagu sameeyay aanu waxba sheegin?**

Haddii rabitaanka qofku aanu caddayn, ma ahan in hawsha la sii wado. Ma jiro xaq guud oo lagu billaabi karo in qof kale loo galmoodo ama fal galmo ah lagu sameeyo, haddii aanu qofkaas rabitaankiisa muujin.

**Maxaa dhacaya haddii uu lamaanahaygu jecelyahay, in aan galmada billaabo anigoo aan si gaar ah u weydiin?**

Ujeedadu ma ahan in la xaddido galmada u dhexeysa dadka qaangaarka ah ee aan ku xadgudbayn xaqa isu talinta galmada la xiriirta ee qofka kale. Waxaa ikhtiyaarnimada caddayn u noqon karta tusaale ahaan xiriirka horay uga dhexeeyay labada dhinac iyo qaabka war isgaarsiintooda.

Galmo hore oo labada qofood u dhexeeysay oo kaliya ma ahan mid ka dhigan in ay tahay ikhtiyaar uu qofku uga qaybqaadanayo galmo wakhtigaas kaddib dhacaysa.

**Maxaa dhacaya haddii uu falka kaddib uu qofka kale sheego in aanay ikhtiyaar ahayn?**

Falku waa kufsi, haddii aanu qofka kale galmada uga qaybqaadan si ikhtiyaari ah intii uu falku socday. Haddii uu qofka kale falka kaddib ka qoomameeyo galmadii uu ka qaybqaaatay ama sida uu u arkayay ay qaab negatiif ah isu beddesho galmada kaddib, arrintu sidaas ma ahan.

**Maxaa dhacaya, haddii uu qofku sheego xadaymo la xiriira qaabka wasmada loo samaynayo, qofka kalana aanu xadaymahaas ilaalin?**

Xaqa isu talinta ee galmada la xiriira wuu jirayaa xittaa inta wasmada lagu jiro. Haddii uu qof ka mid ah labada dhinac uu sheego xadaymo ku saabsan sida galmada loo samaynayo, haddii aan xadaymahaas loo hoggaansamin waxay noqon kartaa ku xadgudubka xuquuqda isu talinta galmada la xiriirta ee qofka kale. Waxaa kale oo xuquuqda isu talinta galmada la xiriirta ku jirta, xaqa uu qofku u leeyahay in uu markasta diidi karo sii wadista galmada, haddii xittaa ay rabitaanka labada dhinac markii hore ku billaabatay.

**Miyuu qofku faham la'aan ama si kama' ah u kufsan karaa qof kale?**

Maya. Falka waxaa qofka loo ciqaabi karaa oo kaliya marka uu ulakac yahay. Ulakacnimada qofka falka geystay waxaa lagu qiimeynayaa habsami-socodka baaritaanka dembiga, iyo ugu dambeyn fadhiga maxkamadda. Sida caadiga ah, dadku waxay rabitaankooda ka qaybqaadashada galmada u muujiyaan si cad, sidaas darteed ikhtiyaarnimo la'aantu ma ahan wax aan u caddayn qof kale. Haddii rabitaanka qofku aanu caddayn, ma ahan in hawsha la sii wado.

**Ma kufsibaa hadda kaddib xittaa haddii xoog-sheegasho ama hanjabaad qof kale loogu galmoodo?**

Haa waa tahay, si cad ayaana taas sharciga loogu caddeeyay.

## Taabasho galmo la xiriirta

Taabashada galmada la xiriirta waxay quseysaa falalka kale ee galmada ee aan wasmada ahayn. Waa fal aan la rabin oo ka daran faraxumaynta galmada la xiriirta. Waxaa sharciga lagu beddelay xeerkii hore ee ku qasbidda fal galmo ah waxaana lagu beddelay mid cusub oo ku salaysan qeexitaanka oggolaanshada galmda.

Taabashada galmada la xiriirta waxaa loola jeedaa falal galmo ah oo loo sameeynayo qaab taataabasho ama habab kale ah, kuwaas oo aanu qofka kale uga qaybqadanayn si ikhtiyaar ah, kuwaas oo sida muuqa xadgudub ku ah xaqa isu talinta galmada la xiriira ee qofka kale. Falalka noocaas ah waxay noqon karaan xubnaha galmada muhiimka u ah oo xoog loo taataabto, qofka kale oo lagu qasbo in uu daawado galmo uu qofka falka geystay samaynayo ama in uu sameeyo fal galmo ah oo isaga ku wajahan. Taabashada galmada la xiriirta waxay sidoo kale noqon kartaa sawiridda xubnaha taranka ama galmooshada qof kale.

## Faraxumayn galmo la xiriirta

Taataabashada faraxumaynta ah ee galmada la xiriirta waxay horay xittaa u ahayd fal ciqaabi ka dhalanayso. Faraxumaynta ku qoran sharciga cusub waa falal faraxumeyn ah oo habab kale oo galmo la xiriira loo sameeyay, marka ay u daran yihiin si la mid ah sida taataabashada oo kale. Faraxumaynta galmada la xiriirta waxay noqon kartaa tusaale ahaan hadal ahaan, dirista ama tusidda farriin ama sawir, sawir ka qaadista ama isqaawinta.

**Waa noocee falalka faraxumaynta galmada la xiriira ee uu sharcigu dhigayo?**

> Falalka taabashada ah waa tusaale ahaan buraashidda, majuujis ama dhabaandhabidda qof kale. Sida uu qabo sharciga cusub, faraxumayntu waxay noqon kartaa tusaale ahaan daba-socoshada aan la rabin ee qof kale la daba socdo iyadoo loo soo jeedinayo galmo, dirista farriin sawir ama hadal ah oo galmo la xiriirta, xubinta taranka oo qofka kale la tuso, goonnada hoosteeda oo qofka kale laga sawiro ama shaatiga oo darfaha kor looga qaado.

**Miyeey ammaanidda muuqaalka qofka kale ama ka codsashada in uu ballan shukaansi u raaco ay tahay faraxumayn galmo?**

> Faraxumaynta galamda la xiriirta ee hadalka ah waa qashqashaad cad oo ay darnaanshaheedu ay lamid ah taataabshada galmada la xiriirta. Waxa macnaha samaynaya waa, hadalka la sheegayo, meesha lagu sheegayo iyo nooca uu yahay xiriirka labada dhinac ka dhexeeya.

**Miyeey qaawanaan lagu dabaashu marka cariishka xagaaga la joogo tahay sida uu derisku u arko faraxumayn galmo?**

> Shardigu waa in falku uu yahay mid galmo la xiriira qof kalana uu ku wajahanyahay. Xeebta cariishka xagaaga oo qaawanaan lagula dabaasho ama sawnada oo qaawinaan lagu galo ma ahan wax Finland looga arko fal galmo la xiriira.

## Baahinta oggolaansho la’aanta ah ee sawir galmo la xiriira

Lama bandhigi karo lamana faafin karo sawirro ama fiidiyow ama agab kale oo la duubay oo ku xadgudbaya xuquuqda isu talinta galmada la xiriirta ee qof kale.

Falku waa dembi mana ahan mid ku xiran, in qaadista sawirka uu oggolaa ama diiday qofka sawirka ka muuqda.

Haddii sawir galmo la xiriira la qaado iyadoo aanan oggolaansho looga heysan qofka ka muuqda sawirka, wuxuu falku noqon karaa mid ciqaabi ka dhalanayso oo la mid ah taabasho ama faraxumayn galmo la xiriira.

**Xiriirka lamaanaha dhexdiisa ayaa si isfaham ah loogu qaaday sawir galmo la xiriira. Labada lamaane mid kamid ah ayaa sawirka tusay saaxiibkiisa isagoo aan oggolaansho ka heysan qofka kale sawirka ka muuqda. Falkaas miyaa la isu ciqaabayaa?**

Tusidda hal sawir ama faylka sawirrada oo la faafiyo ayaa ku filnaan karta buuxin astaanta dembiga lagu garto.

**Maxaa dhacaya, haddii sawirka la is-dhunkanayo oo kaliya ama uu qofka kale xeebta joogo isagoo gashan dharka dabaasha?**

Haddii hannaanka galmada ee sawirka ka muuqda uu yar yahay, inta badan falkaas looma qaato in sawir galmo la xiriira oggolaansho la’aan loo faafiyay.

## Dembiyada galmada ee carruurta laga galo

Dembiyada galmada la xiriira ee carruurta laga galo wuxuu sharciga cusub u arkayaa sidii hore si ka daran. Waxaa kale oo la xoojiyay ciqaabaadka dembiyadaas ka dhalanaya.

Asalku waa, in cunuggu aanu oggolaan karin in uu qof qaangaar ah la sameeyo fal galmo ah. Sida caadiga ah, sharcigu wuxuu dhigayaa, in cunug kayar 16 sano oo loo galmoodo ay tahay kufsi carruureed, halka markii hore uu ka ahaa dembi faraxumayn ah.

Waxaa kale oo carruurta 16 sano ka weyn laakiin aan 18 sano buuxin loo ilaalinayaa sidii hore si ka fiican.

Ma ahan wax la isu ciqaabayo galmo u dhexeysa dhallinyarada oo aan lagula xadgubayn xaqa isu talinta galmada la xiriira ee qof kale.

**Miyuu dembi gelayaa qofka 18 sano jira haddii uu u galmoodo qof 15 sano jir ah?**

Maya, haddii labada dhinac ay si simman arrinkaas uga qaybqaataan. Ma ahan in biseylka labada dhinac uu farqi weyn u dhexeeyo mana ahan in lagu xadgudbo xaqa isu talinta galmada la xiriira ee qofka kale.

**Miyaa dembi lagu gelayaa heysashada sawir qaab galmo ah u muujinaya cunug, haddii si kama’ ah loo galo bogag internet oo qaab galmo ah cunug loogu soo bandhigayo?**

Maya, ee waa in markaas ay ujeedadu ahaataa in meesha loo galay si loo helo agabkaas. Ujeedada waxaa caddayn kara tusaale ahaan gelitaanka soo noqnoqda ee bogaggaas ama ereyada meesha raadinta lagu qoray.

**Miyaa la isku ciqaabayaa sawirada uu qofku carruurtiisa xeebta uga qaaddo?**

Maya, haddii aanay sawirradu ahayn kuwa galmo la xiriira. Waxyaabaha galmada la xiriira ee sawirka ku jira waxaa loo qeexayaa sidii hore si lamid ah. Waxaa arrintaas saameyn ku leh, sida cunugga loo soo bandhigayo iyo da’diisa.